



Hamilton

Communicable Disease Control and Wellness, Public Health
Healthy and Safe Communities Department, City of Hamilton
110 King St. W., 2nd Floor
Hamilton, Ontario L8P4S6

Macluumadka Tallaalka Caruurta:

Tallaalku wuxuu muhiim u yahay caafimaakeenna. Tallaalka carruurta waa **BILAASH**.

Gobolka Ontario, carruurta **waa inay qabaan** dhammaan tallaalkooda inta aanay billaabin iskoolka. fasalka 7aad, carruurta waxaa lagu siiyaa iskoolka 3 tallaalko oo muhiim ah (HPV, Hepatitis B and Meningitis C-ACYW135).

Adeegyada caafimaadka dadweynaha waxay keydiyaan tallaalkada ardayda.

Waalidiinta, fadlan ku soo wargeliya Adeegyada caafimaadka dadweynaha tallaalkada ay qabaan carruurtaadu.

Sidee?

Haddii aad haysid diiwaanka tallaalka ilmahaaga ee dal kale, fadlan u turjum af Ingiriis kadibna nuqulka oo turjuman u dir Adeegyada Caafimaadka Dadweynaha:

- U dir:
Vaccine Program, PO Box 897
Hamilton, ON L8N 3P6
- Qof ahaan:
110 King St W, 2nd Floor
Hamilton, ON L8P 1A2
(Robert Thompson Building in Jackson Square)

Haddii aadan haysan diiwaanka tallaalka, ilmahaagu wuxuu u baahan doonaa inuu mar kale qaato talaalka. Tallaalku waa mid aad ammaan u ah. Waa ammaan in mar labaad la tallaalo. Dhakhtarkaagu wuxuu ku siin karaa tallaalkada. Ilmahaagu wuxuu u baahan karaa 3 ilaa 4 ballamood.

Ilmahaagu haddii uusan **lahayn kaar caafimaad**, ballamaha tallaalka waxaad ka sameysan kartaa:

- Public Health Community Clinic
905-540-5250 -- u sheeg luqaddaada haddii aad u baahn tahay mutarjum.

Haddii aannu ilmahaagu haysanin tallaalkada looga baahan yahay dugsiga, taasi waxay keeni kartaa in iskoolka laga joojiyo. Haddii ay kuu timaado warqad ku saabsan iskoolka ka joojinta ilmahaaga iskoolka, fadlan wac Adeegyada Caafimaadka Dadweynaha lambarka 905-540-5250.

www.hamilton.ca/vaccines